

Sibteembar, 2020

Waaladiinta Qaaliga,

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) waxay isticmaashaa Ururka Qiimeynta Northwest (NWEA) ayaa Cabiro Hormarka Waxbarashada (MAP) sida baaraha caalamiga ah sadex jeer sannadkiiba - Deyrta, Qaboobaha, iyo Gu'ga.

Iyada oo ah dadaal lagu qabatimayo dugsiyada badan ee degmada gudaheeda ah iyo jawigeena cusub ee onyalanka ah, Waaxda Maamulka Qiimeynta ee Degmo Dugsiyeedka Degmada DeKalb, ayaa dejisay in mudada imtixaanka MAP ee Deyrta la furo Isniinta, 21-da Sibteembar, 2020, lana xiro Arbacada, 11-ka Nofeembar, 2020. Si kastaba ha noqotee, dugsiga ardaygaaga ayaa soo sheegi doona mudada gaarka ah ee imtixaankiisa ama imtixaankeeda MAP ee Deyrta.

Maaddaama Degmo Dugsiyeedka Degmada DeKalb ay sannad-dugsiyeedka ku bilaabayso onlayn, qiimeynta Kobaca ee MAP ee Deyrta ayaa la bixin doonaa iyadoon goob jog la ahayn (onlayn). Haddii jawiga waxbarashadu ku yimaado isbeddel inta lagu gudajiro mudada imtixaanka MAP ee Deyrta, ardayda waxaa lagu siin doonaa imtixaanka MAP ee Deyrta onlayn ama fool-ka-fool. Fadlan la soco in iyadoo aan la eegayn jawiga waxbarashada ama imtixaanka, dhammaan ardayda la siin doono fursad ay kaga qaybgalaan imtixaanka MAP ee Deyrta.

Imtixaanada MAP Growth ka bilow NWEA® waxay gaar u yihiin in ay la qabsadaan iimtixaanada lagu qaado kumbiyuutarka ama tablet-ka. Tani waxaa laga wadaa su'aalaha tijaabada aad ayay u adkaaneysaa markii canugaaga uga jawaabo su'aasha si sax ah oo sahlan markii canugaaga uga jawaabo su'aasha si qaldan. Warbixinta soo bandhigtay ee tijaabada waxay ku xirantahay manhajka Waaxda Waxbarashada Georgia iyo waa isla warbixinta in canugaaga aheyd in mar hore la keeno dugsiga.

Haddii, iyada oo ku saleysan qorshaha ilmahaaga ee IEP, 504-IAP, ama qorshaha EL-TPC, ay jiraan qabatim la oggol yahay oo ah in ilmahaagu heli karo qiimaynta MAP ee Deyrta, waxaa loo siin doonaa sida ku xusan qorshayaashooda.

Fadhi kasta oo ah imtixaanka Kobaca ee MAP ee onlaynka ah wuxuu ka koobnaan doonaa sagaal arday (sideed arday, iyo cunugaaga). Bixin kasta oo ah imtixaanka fool-ka-foolka ah waxay ka koobnaan doontaa laba iyo toban arday (kow iyo toban arday, iyo cunugaaga).

Hoos waxaa ku qoran tilmaamo ku saabsan sida loogu diyaariyo ilmahaaga qiimaynta Kobaca ee MAP ee onlaynka ah. Intaa waxaa dheer, waxaa ku lifaaqan warqaddan Diiwaanka Gelida Degdegga ah ee Ardayga oo ku siin doona muuqaal ah sida loo helo qiimeynta MAP.

Maalinta Imtixaanka Kahor

1. Hubi in aalada ilmahaagu leedahay internet.
2. Hubi in aaladaadu buuxinayso shuruudaha imtixaanka adoo adeegsanaya [Qalabka Baarista ee Goobta Shagada](#).
3. Hubi in ilmahaagu haysto samaacada dhagaha (Fasalada K - 2 iyo ardayda leh qabatimiyada loogu talagalay in qoraalka lagu beddelo hadal). Fadlan la xiriir dugsigaaga haddii loo baahan yahay samaacada dhagaha.
4. [Daawo fiidiyowga hordhac ah ee](#) Kobaca MAP
5. Iskaga tijaabi imtixaanka halkan practice.mapnwea.org

(Magaca isticmaalaha: Grow Lambarka sirta: grow)

Maalinta Imtixaanka

1. U yaree waxyaabaha mashquulinayo ilmahaaga sida ugu macquulsan.
2. Sii ilmahaagu jawi xasilloon oo imtixaanku ku sameeyo.
3. Raac dhammaan tilmaamaha macallinka / hawlgaliyaha.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan MAP Growth, booqo: NWEA.org/Parent-Toolkit.
Haddii aad qabtid wax ah su'aalo dheeraad ah, fadlan la xiriir _____ (insert
Test Coordinator's Name) lambarka **678-XXX-XXXX**.

Daacadnimo,

Maamulaha